# Sida loogu noqdo Taakuleeye Fiican Ilmahaaga hela Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah

How to be a Good Advocate for Your Child in Special Education Services

## Waxaan rabaa inaan u noqdo taakuleeya fiican ilmahayga. Sidee u bilaabaa?

Ogow xaquuqdaadda! Soo ogow waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee u ilmahaagu helo karo. Hel faham aasaasi ah oo ku saabsan habka qiimeynta ee uu iskuulku isticmaalo si aad u go'aansato adeegyada uu ilamaagu helayo. Waxaa ku qoran gadaalka warqadan liis shabakado (websites) u noqon kara ilo wacan oo akhbaareed qoysaska iyo ardayda naafada ahba.

Warqadani waxa ay kaa caawin kartaa inaad diyaar garayso aadna abaabusho kulano aad la yeelato iskuulka. Sidoo kale waxa ay ku siin talo ku saabsan waxa la sameeyo hadii dhib dhaco.

## Sidee ayaan ku ogaan karaa xaqqayga iyo adeegyada waxbarshada gaarka ah?

- Kolka qiimeynta iskuulka, kulanada IEP ga, iyo go'aanada meeleynta ahi ay dhacayaan, waa in ogaysiis qoraal ah horey laguu sii siiyo, iyo nuqul (copy) ku saabsan xaquuqda waalidka iyo habraacyada degsan ee ku ilaalinaya adiga. Si taxadar leh u Akhri kuwaa waydiina su'aalo ku saabsan wixii aadan fahmin.

- Tag kulanada tababarka waalidka iyo xaquuqda ardayga ee waxbarashada gaarka ah. Ururada taakuleeya naafada sida PACER,  Arc, iyo NAMI- MN in badan ayey kulanadaa qabtaan.



- La xiriir hay'adaha naafada, sida, Minnesota Disability Law Center, PACER, Arc, iyo NAMI- MN, hadii aad qabto su'aalo ama dhibaatooyin ku saabsan adeegyada waxbarashada gaarka ah.

- Waxa ay kaa caawin karaan inaad la hadasho waaldiinta kale. Eeg beeshaadda si aad u aragto inay ka jiraan urur waalidku isku bahaystay ama urur naafadu leedahay oo soo saara akhbaar iyo warbixino qoraal ah.

## Sida la isu abaabulo?

Kolka ay wax idin dhex maraan hay'ad adiga iyo qoyskaagu aad ka heshaan gargaar, qoraal  fiican ka samee wixii idin dhex mara. Taa macnaheedu waa ku hay dhamaan koobiyada warqadaha hal meel, si kolkii aad u baahanto aad degdeg ugu hesho. Gal gelintu waa hab wacan oo warqadahaaga oo dhan kuligood hal meel aad ku wada hayn karto. Ku dhiiri-geli ardaygaaga inuu

isaguna warqadihiisa u gaarka ah uu meeldhigto. Waxa kale oo aad waydiisan kartaa iskuulku inuu kuugu soo diro qorshaha gaar wax u barida ee IEP iyo wixii kale qoraalo muhiim ah iyagoo emayl maldahan ah ama in guriga laguugu soo diro iyagoo boqshad xiran ku jira. Kolkaa kuli waa aad haysan kartaa iyagoo lagu haynayo gal 3-dalool leh, kumbuyuutar ama aalado kale.


Dukumiintiyadaa waa inay ku jiraan:

- Nuqulada warqadaha ama emaylada aad dirto ama aad hesho
- Nuqulada qiimeynta, warbixinada horu-kaca ama warxbixinta kaarka ee ardayga
- Nuqulada IEPs, IFSPs, ama qorsheyaasha adeegyada kale
- Wixii dukumiinti ah ee la xiriira edbin, oo ay ku jiraan ogaysiisyada ama iskuul ka fariisin
- Buuga diiwaanka wada xiriirka iskuulka iyo waalidka or emaylada
- Wixii kale ee akhbaar ah ee ku saabsan ilmahaaga
- Buug ay ku qoran yihiin telefoonada la isku diray

Waxaad xaq u leedahay inaad aragto diiwaanada iskuulka aadna codsato in koobi lagaa siiyo. Waa ra'yi wacan in la eego ina la qorsheeyo in dib loo eego diiwaanada iskuulka ugu yaraan hal mar sanadkiiba.

## Sidee ugu diyaar garoobaa kulanada?

Horey u sii ogow waxa kulanku ku saabsan yahay, cida imaanaysa. Kulanka IEP ga, macalinka waxbarashada gaarka ah, ugu yaraan hal macalin oo caadi ahi iyo maamule waa inay joogaan. Kulanka waa in la qabtaa waqti adiga iyo iskuulkuba aad ka qayb gali kartaan. Waa inay horey kuugu sii ogaysiiyaan waqtiga kulanka si aad adigu isugu diyaariso ka qayb galka kulanka.



Waxaad kaloo waydiisan kartaa iskuulku inuu kaga hadlo kulanka arrimaha aad doonayso inaad ka hadasho adigu. Waa muhiim inaad adigu hubiso inuu jiro waqti looga hadlo walaacaaga aadna ku waydiiso su'aalahaaga.

Hadii kulanku uu ku saabsn yahay qiimeynta ilmahaaga, ugu yaraan hal qof oo ka socda kooxda qiimeyntu waa inuu joogaa. Codso in nuqul lagaa siiyo wax bixinta qiimeynta ka hor kulanka. Si taxadar leh u akhri, qorna wixii su'aalo ah ee aad qabto ee ku saabsan qiimeynta.

Fariiso kulanka ka hor, qorna waxa ilmahaagu uu ku fiican yahay ama uu u baahan yahay in laga caawiyo.  Iskuulku waa inuu ku waydiiyo wixii walaac ah ee aad ka qabto ilmahaaga. Qor wixii ra'yi ah ama talo ee aad hayso ee ku saabsan adeegyada waxbarasho ama barnaamijyada ilmahaagu uu helo, oo ay ku jiraan fikrado ku saabsan wax kasta oo ilmahaagu uusan helayn hada oo aad is leedahay waa ay caawin lahaayeen. Diyaar u ahow inaad iskuulka waydiisato inuu bedelo waxyaabaha aad rabi lahayd in la bedelo.

Ka soo qaado nuqul galkaaga waxa ku jira. Hubi inaad nuqul ka haysato qiimeyntii ugu dambeysay ee ilmahaagu maro iyo qorshada hada ee IEP ama IFSP. Hubi inaad taqaan akhbaarta ku jirta ilmahaaga IEP/IFSP giisa.

Waxa aad xaq u leedahay inaad kulan codsato markii aad rabto aadna u soo wadato qof kale kulankaa. Kala hadal qofkaa kulanka ka hor inuu kula lafo guro arrimaha aad dooanayso inaad uga hadasho kulanka. Waydii qofkaa inuu kaa caawiyo inaad qoraal ka samaysato waxa looga hadlayo kulanka.

## Ilmahaygu ma inuu joogaa kulanka kooxda?

Ka hor da'da 14, ilmaha waxaa loogu yaboohaa inuu la qayb galo kulanada IEP. Ilmaha ka yar 18 ka sanno ama mas'uulka laga yahay, waalidka ayaa iska hel go'aanka in ilmahu kulanka tago iyo in kale.

Marmarka qaarkood waa ay wacan tahay in ilmahu qayb ka noqdo kulanka. Waa muhiim inaad ilmahaaga ka caawiso inuu diyaar yahay adigoo waydiinaya inay ka jiraan wax dhibaatooyin ah iskuulka iminka. Waydi iilmahaaga waxa runtii iskuulka ka jira ee uu xiiseeyo iyo waxa uu doonayo in wax laga bedelo.



Hadii ilmahaagu uu 14 sanno ka weyn yahay, waxaad kaloo waydiin kartaa inay wax fikrad ah ka qabaan waxa ay doonayaan inay sameeyaan dugsiga sare ka dib. Isku day inaad hal mar ka badan kala hadasho ilmahaaga waxyaabahaa ka hor kulanka IEP ga.

Ardayda ka weyn 18 sanno sharciyan waa qaan-gaar go'aankii ay rabaana iyaga ayaa gaari kara. Waxa ay leeyihiin xaquuq la mid ah kuwa dadka waaweyn aan ka ahayn kolka mas'uulka laga yahay oo aysan iyagu iskood isku meel marin karin.

(Minnesota Disability Law Center) waxa ay ku dhiiri-galisaa waalidiinta oo dhan inay baraan ilmahooda xaqooqdooda iyo sida loogu diyaar garoobo kulanada IEP ga <u>ka hor</u> inta aysan gaarin da'da 18 ka sanno.

## Maxaan sameeya inta kulanku socdo?

Diyaar ahow. La imow nuqulada dukumiintiyada muhiimka ah, qoraal ka samee waxa kulanka looga wada hadlo, qalinka iyo warqadna hayso.

La wadaag kulanka faallooyinkaaga iyo walaacaaga. Hadii ay kugu adag tahay inaad kulanka ka hadasho, su'aalahaaga qoraal ka dhigo ka dibna u dhiib macallinka kulanka jooga.

Waydii in iskuulku uu hayo wax qoraalo ama macluumaad oo ah dhab-dhaqanka ilmahaaga.

Xasuusnow qorshaha IEP/IFSP waa khasab inuu ku salaysnaado baahida ilmahaaga. Hadii aadan ku raacsanayn kooxda qorshaheeda, u sheeg <u>si cad</u> sababta aadan ugu raacsanayn qorshahooda ka dibna soo jeedi talooyin ku saabsan waxa u baahan in la bedelo.

Waydii iskuulku inuu uga soo jawaabo is bedelada aad codsatay qoraal ahaan – waydii waxa la yiraa "Ogysiisyada hore ee qoran" kolka aad waydiisato inay sameeyaan wax ka duwan IEP.

Hadii lagu waydiisto inaad wax saxiixo xilliga kulanka, ka fakar si taxadar lehna u akhri waxa aad saxiixayso ka hor inta aadan saxiixin. **Khasab ma aha inaad wax saxiixso waqtiga kulanka.** Waxaad haysataa 14 cisho si aad uga soo jawaabto qoraal ahaan talada qoran ee iskuulku soo jeediyey. U sheeg kooxda inaad doonayso inaad guri u qaadanayso qoraalka aadna akhri ka hor inta aadan saxiixin. Marna ha saxiixin foom banaan ama IEP qayb uun la sameeyey. Mar walba waxaa fiican in IEP ga guriga loo qaato si taxadar lehna loo akhriyo ka hor inta aan la saxiixin. **Laakiin** hubi inaad qoraal uga soo jawaabto ka hor 14 ka cisho inta aysan dhamaan!

Hadii aadan iskuulka la socodsiin inaadan ku raacsanayn go'aankooda ka hor waqtiga laguu qabtay inaad ka hor soo jawaabto, kolkaa IEP waa uu dhaqan geli saxiixaaga la'aantii. Waxa aad codsan kartaa kulan kale si xal loogu raadiyo arrintantaada.

## Maxaan sameeyaa kulanka ka dib?

Dib u akhri warqadihii aad ka heshay kulanka oo dhan. Si taxadar leh u akhri IEP ga, si aad u hubiso inuu tilmaamayo baahida ilmahaaga iyo in barnaamijka aad ka ogaan karto adigu:

- Waxa ay yihiin hadafyada la higsanayaa sannadkaa,
- Waxa ay yihiiin waxa lagu baranayo fasalada oo dhan,
- Jadwalka fasalada rasmiga ah iyo
- Cadadka waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee ilmahaagu heli doono.

Hadii aysan kuu cadayn, ha saxiixin. Qoraal ahaan kula socodsii iskuulka 14 cisho gudahood inaadan ku raacsanayn iskuulka qorsahdooda IEP ga. Waa muhiim adigu inaad codsato 'kulan dhexdhexaadin ah" isla markaaba. Waa in aadan ku raacin qorshaha IEP aadna ku codsado kulan dhexdhexaadin ah 14 cisho gudahood si aad uga joojiso iskuulku inuu ku dhaqaaqo arrimaha uu soo jeediyey.

**Mar labaad, hadii aadan la socodsiin iskuulka inaadan ku raacsanayn 14 kaa cisho gudahood, qorshaha IEP waa uu dhaqan gelin saxiixaaga la'aantii.** Waa aad codson kartaa kulan kale si loo xaliyo arrintaadda.

Hadii ay taasi shaqeyn waydo, caawimaad hel! La xiriir kooxaha taakuleynta.



## Sidee ayaan xiriir wada shaqeyn ah oo wacan ula sameynsan karaa iskuulka?

Mar walba macalimiinta ka war hay oo kula xiriir telefoon, qoraal ama booqasho. Waydii su'aalo hadii aadan fahmin wax ku saabsan waxbarashada ilmahaaga.

La socodsii shaqaalaha kolka ay shaqo fiican qabtaan. La hadal kolka aad dareento inaan wax fiican qaban. Mar walbaba kala war haya oo wada xiriira.

Isku day in wax kastaa ay furnaandaan oo wanaag jiro.

Mar walba dib u eeg the IEP ga si aad u hubiso in loo hogaansan yahay uuna wali ku haboon yahay waxa ilmahaagu u baahan yahay.

Ku hel warbixinada horukaca qoraal ahaan, telefoon, ama kulanada. Warbixinadaasi waa inay kuu sheegaan in ilmahaagu uu sameynayo horukac ah gaarida hadafyada lagu cayimay IEP. Waxaad ku codsan kartaa warbixinada cusub emayl ahaan buuga qoraalka ee maalinlaha ah.


## Maxaan sameyn karaa hadii aniga iyo shaqaalahu aan ku heshiin wayno qaybo ka mid qorshaha?

Waalidku waxa ay xaq u leeyihiin inay diidaan dhamaan ama qaybo ka mid ah qorshaha iskuulku soo jeedinayo. Qoraal ahaan kula socodsii inaadan ku raacsanayn iyaga wax ka mid ah IEP. Cayim waxaase waxa ay yihiin.

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato kulan kale oo IEP ah, dhex-dhexaadin, waan-waan ama dhageysi dacwo. Waxaa fiican in lagu bilaabo arrinta in kulan kale oo IEP ah la codsado. Waxaasi fiican laguugu boorinyaa inaad hesho qareen ka hor inta aadan codsan dhageysi dacwo.

## Kala doorashooyinka Xalinka Khilaafaadka - Guudmar

Waxaa jira siyaabo badan oo loo xaliyo khilaafaadka la xiriira waxbarashada gaarka ah. Waana ay ka du-duwanaan karaan siyaabahaasi. Ogaanshaha waxyaabaha ugu fiican ee la isku dayi karo iyo marka la isku dayayaba waxa ay ku xiran tahay waxa jaa horey la isugu dayey iyo waxa khilaafku ku saabsan yahay. Tani waa guud-mar ku saabsan doorashooyin kala duwan oo kuu banaan.



**Marxalada 1:** Khilaafaadyo iyo dhibaatooyin badan waxaa lagu xalin karaa hal mar oo la waco kiis maamulaha. Hadii arrinta aan wali la xalin, codso kulan aad la qaadato kooxda IEP ga. Waa muhiin inaad meel ku qoroto cidda aan la hadasho, waxa aad ka wada hadasheen ama aad waydiisay iyo waxa ay kugu yiraahdeen.

***Ogow**: hadii arday uusan xaq u lahayn adeegyada waxbarashada gaarka ah, kolkaa la yeelanayo kulanka kooxda IEP. Hadii khlaafku ku saabsan yahay in ardaygu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo in kale taa waxaa wax looga qaban karaa kulan yar oo la qabto, siyaabo kale oo khlaafka loo xaliyo iyo askhtako ama dacwo qaadid.*

**Marxalada 2:** Marxalada labaadi waa mid weyn. Khilaafaadka waxaa wax looga qaban shir dhex-dhexaadin ah, waan-waan ama kulan ay qaban-qaabiso kooxda IEP du. Kuwaasi dhamaan waa kuwo ikhiyaar ah labada qolona waa inay ogolaadaan. Iskuulku waa inuu ugu yaboohaa xulashooyinkaa waalidka, laakiin waa ay diidi karaan qaar ama dhamaantood oo waxa ay codsan karaan dacwo qaadid.

Ka eeg shabakada http://education.state.mn.us/MDE/fam/sped/conf/ tilmaamaha kala duwanaanta iyo ujeedooyinka mid kasta oo xulashada ah oo ay ku jiraan kuwa hoos lagu xusay.

**Marxalada 3:** Marxalada sedexaadi waa mid aad u weyn oo askhatko iyo dacwo qaadid ah. Dacwadahaasi ma aha kuwa ay qaadaan dowlada gobolka iyo mida dhexe laakiin waa dacwooyin maamul oo cul-culus. Waxaa jira sharciyan waxyaabo laga rabo inuu waalidku sameeyo ka hor inta uusan u gudbin maxkamad gobol ama mid dowlada dhexe leedahay.

**Ashtakooyinka** caadiyan waxa ay qaataan waqti yar badanaana qareeno ma galaan. Astkooyinkaa waxa ay wax ka qabtaan dhibaatooyin dhacay ilaa iyo muddo 1 sanad ah ka hor.

**Dhageysiga** waxa uu u qaataa muddo dheer qareenana inta badan waa ay ku jiraan dacwada. Dhageysiga caynkan ee dacwooyinku waxa uu wax ka qaban karaa dhibaatooyin dhacay ilaa iyo 2 sanno ka hor laakiin waa in uu arday wali iskuulkii dhibku ka dhacay uu dhigtaa. Haddii u ardaygu uu wareego iskuul kale, waxaa laga yaabaa inaad dhumisid xaquuqdii aad u lahayd in dacwadaada la dhageysto.
Natiijooyinka iyo go'aanada la soo baxa dacwadaha labadaba racfaan maxkamadeed waa laga qaadan karaa. Ashtakooyinka racfaanada laga qaadato waxaa loo gudin karaa uun maxkamada racfaanka ee sare ama maxkamada deegaanka ee dowlada dhexe.

## Macluumaad dheeri ah

Shabakadan hoose waa ilo ay ka heli karaan akhbaar qoysaska ardayda naafada ah haysta:

- www.thearcofminnesota.org - The Arc of Minnesota
- www.thearc.org - The Arc of the US
- www.proofalliance.org – Proof Alliance. Kahortaga jahwareerka uurjiifka uurjiifka uurjiifka iyo taakuleynta dhammaan waxyeelada. (hore The Minnesota Organization on Fetal Alcohol Syndrome – MOFAS)
- www.pacer.org - PACER Center
- www.cleweb.org - Center for Law and Education. Waxaa ku qoran maqaao ku saabsan waxbarashada gaarka ah iyo macduucyo kale oo la xiriira waxbarasahada gaarka ah.
- www.c-c-d.org/ - Consortium for Citizens with Disabilities
- www.copaa.org - Council of Parent Advocates and Attorneys
- http://idea.ed.gov/ - United States Department of Education
- http://education.state.mn.us/MDE/fam/sped/ - Minnesota Department of Education's shabkadeeda la xiriirta waxbarashada gaarka ah.

## Sidee ayaan ula soo xiriiri karaa Minnesota Disability Law Center?

The Minnesota Disability Law Center waxa ay u fidisaa gargaar dhanka sharciga ah oo lacag la'aan ah dadka naafada ah ee Minnesota.

Si aad u codsato caawimaad, wac:
Beledyadda: (612) 334-5970
Telefoonka lacag la'aanta ah: 1-800-292-4150

Dhamaan wicitaanadda kale oo dhan: (612) 332-1441



Minnesota Disability Law Center
(Xarunta Sharciyada Dadka naafada Ah)
111 North 5th Street, Suite 100
Minneapolis, MN 55403

https://mylegalaid.org/disability-law-center/

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**